JUQURAAFI F.4

Qeeybta: 1aad

SU'AALO IYO JAWAABO:

1. Caddee waayada jiyooloojiga?

- **Xeeldhereyaasha cilmiga jiyooloojiga waxay isku raaceen in da,da dhulka loo qeybiyo afr wakatana wu xuu usii qeybsamaa xiliyo.**

2. Falanqee ahmiyadda dhaqaale ee waayada jiyooloojiga?

- **Dhadhaab sameysanka xiligaa wuxuu kakooban yahay caydhiinka macaadinta iyo birta maganiiska, sidokale waxaa laga helaa faar dhuxul aha waxay kufiliqsantahay meelaha dhuxusha lagaqodo.**

3.Caddee kaalinta culimada muslimiinta ay ku lahaayeen cilmiga jiyooloojiga?

- **culimada muslimiinta waxay ku dhiseen cilmiga jiyoolojiga qaab maangal ah oo aadna u haboon, taa oo ka duwan qaabkii ay cilmiga jiyooloojiga ku dhiseen Gariigga.**

4.Qeex qaab dhisameedka jiyoolooji ee dhulka soomaaliya?

- **waxaa suuragal ah in dhadhaabyada sagxada asaasiga ee qaab dhismeedka dhulka soomaaliya ay katimid sagxadii hore ee Afrika, waxaana lagu tilmaamaa in ay yihiin dhadhaabyada ugu horreeyay ee qolofta dhulka.**

5.Sheeg inta lagu quyaaso da,da dhulka? Iyo qoloftiisa?

- **Waxaa lagu quyaasaa da,da dhulka 2000 milyan sano, halka qolofta dhulka da,deeda lagu qitaaso 1500 milyan sano.**

6.Sheeg inta looqeebiyo da, da dhulka ?

- **Da,da dhulka wa xaa loo qeebiyaa Afar.**

7.Wax kaqor dhibaatooyinka carrada ee dhulka soomaaliya?

- **Guud ahaan carrada dhulka soomaaliya waxaa heysta dhibaatooyin ay kamid tahay carro burburka oo ay saba utahay biyaha iyo dadka oo aad ugu howlan jarida dhirta si ay dhuxul uga dhigtaan taa oo keeneysa in ay dhulka soomaaliya burbur farabadan oo kuyimaado.**

8.Tilmaan waxyabaha saameynta ku leh koritaanka dhirta dabiiciga ah?

- **Dhirta dabiiciga ah way kala duwan tahay xagga tilmaamaha, iyo xagga filiqsanaantaba waxaana ka mid ah waxyaabaha saameeya**

1.Carrada 2. Kalasareynta dhulka 3. Heerkulka iyo iftiinka 4. Xaddiga da'aaga.

9.Sheeg noocyada dhirta dabiiciga ah?

- **Dhirta dabiiciga ah waxaa loo qeeybiyaa labo: 1. Keymaha: 2. Harame.**

10.Qeexida waxa loola jeedo nololey?

- **Nololeyda waxaa lagu yaqaan in ay taha qeybta nool eeleh tilmaamo ay kaga duwantahay gibillada kale ee dhulka.**

11.Qeexida waxa ay ka koobantahay nololeyda?

- **Gibilka nololeyda wuxuu ka kooban yahay dhamaan: 1. Carrada 2. Dhirta 3. Xayawaanka 4. Aadanaha.**

12.Tilmaamidda noocyada carrada?

- **Noocyada carrada waxaa ka mid ah: 1. Carro madoow 2. Carro gaduud 3. Carrada hurdiga ah.**

13.Muuji kaalinta Aadanaha juquraafiga ah ee saameeya filiqsanaanta xaya waanada dunida guudkeeda?

- **Aaadanaha waxaa lagu tiriyaa qeyb muhiim ah oo ka tirsan nololeyda Eebbe wuxuu aadanaha u san-duleeyay dhamman waxa dhulka oogadiisa saran aadanuhu inta uu ku jiro howlahiisa kala duwan wuxuuna saameyn weyn ku yeeshaaa deegaanka sida: Hagaajinta dhul-beereecka, dhismooyinka daaraha iwm.**

14. Wax kaqor dhibaatooyinka heysta dhirta dabiiciga ah?

- **Dhibaatooyinka heysta dhirta dabiiciga ah waxaa kacaddeysay warbixinta tilmaamesa horumarka soobaxday sanadku marka uu ahaa 2016 CD ee laxiriirtay isbadalka ku dhacay dhirta.**

15. Wax kaqor dhirta dabiiciga ah?

- **Dhulka aynu kunoolnaha wuxuu la ciirciirayaa noocyo aad u badan oo xayawaano ah, waxaynu uqeybin karnaa ilaa iyo shan qeeybood waxaana mid ah: shimbiraha, daaq cune ama daaqe-(qeeybaheeda duur joogta iyo dab joogta).**

16.Qeex cilmiga jiyooloojiga?

- **Cilmiga jiyooloojiga waa aqoonta ama cilmiga la xiriira barashada ama daraaseynta isbeddellada iyo diinaamikida (dhaqdhaqaaqa).**

17.Falanqee dhaqdhaqaaqyada gilgil iyo saameynta ay ku yeesheen qaab dhisameedka dhulka soomaaliya?

- **Dhaqdhaqaaqyada gilgilka guud wuxuu laxiriiraa sameysanka Gacanka Cadmeed (laga soo bilaabo dhanka galbeed ilaa dhanka bari).**

18.Qeexida waxa loola jeedo gobol dabiici ah?

- **Gobol dabiici ah waxaa loola jeedaa goob dhulka ka mid ah oo leh astaamo isku mid ah marka laga eego xagga cimilada iyo dhirta, kana duwan gobollada kale.**

19.Sheeg inta caro ee jirta noocyadooda?

- **Waxaajira noocyo badan oo caraa waxaana kamid ah carokaduud caro madoow iyo carada looyaqaano caro hurdiha aj.**

20.Tilmaan waxaka mid ah astaamaha gobolada?

- **Waxaaka mid ah astaamaha gobolada:**
- **Heerkulka soosaaraya sanadka oodhan.**
- **Faraqa heerkulka maalintii oo aad uweyn.**
- **Faraqa heerkulka sanadka oo yar kaa oo aan ka badneyn 5% wuxuuna kasiiyaraanayaa badaha korkooda.**

Qeybta: 2aad

Sax iyo khalad su'aasha aad u aragto sax waa(T)tan aad u aragto waa(F)

1.Culimada muslimiinta ah waxa ay isku raaceen in uu ku dhisan yahay cilmiga jiyooloojiga qaab maangal ah oo aadna uhaboon ( ).

2.Muhiimada dhaqaale ee waagan waxaa sabab u ah saameynta dhagaxa, nuuriyada iyo dhhagaxa dhoobada ah( ).

3.Dhadhaab sameysanka xiligaan wuxuu ka kooban yahay beeraha ( ).

4.Xagga dhirirka wuxuu ka gaaban yahay waaga laabaad intii lagujiray waagani ( ).

5.Saliida waxa ay ka mid tahay macaadinta iyo tamarta ( ).

6.Xiligii jiyooloojiga waxaa dhacay waxa loo yaqaano waagii barafka ( ).

7.Ahmiyada dhaqaale ee waagan waxaa loo adeegsadaa carada beerah iyo iwm ( ).

8.Xeeldheereyaasha cilmiga jiyooloojiga waxay isku raaceen in da'da dhulka looqeybiyo labo ( )

9.Xiliyadii oo uu barafka faafayey wuxuu ku faafay wadamo ay ka mid yihiin Ameerikada waqooyi, yurub iyo Aasiya ( ).

10.Aasiya waxaa la rumeysan yahay in bilowgii waagani oo uu soo ifbaxay Aadanaha (Eebbe abuuray), wuxuu gaarayaa dherarka waagani 3 milyan oo sano ( ).

11. Xiligii baliyostostiinka waxaa lagu qiyaasaa da'diisa 2 milyan oo sano ( ).

12.Xiliga cusub waxaa lagu qiyaasaa da'diisa 100 milyan oo sano ( ).

13.Ahmiyada dhaqaale ee waagan waxaa looka fa'iideestaa carada iyo beerah ( ).

14.Saynis yahanka weyn ee ibni siinaa wuxuu ka ga sheekeeyay buugaagtii uu qoray qaarkood cilmiga dhulka sida buugiisii Al-shifa ( ).

15.Bada ayuusiin waxaa dhacday in xiligan dhulka oo si weyn hoos ugu dhacay taa oo sababtay in bada gudaha soo gasho iyada oo ujeedo dhanka waqooyi Galbeed ( ).

16.Dhadhaabyada waaga afaraad xiliga baliyoostiinka wuxuu ku bilowday dhul sameysanka waagan qaab lakab dhagaxeed ( ).

17.Dhaqdhaqaaqa gilgilka guud wuxuu ka xiriiraa sameysanka Gacanka Cadmeed ( ).

18.Waxaa suurogal ah in bada cas ay ku soo fakatay dhamaan dhulka marka lagareebo Boorame ( ).

19.Carada madoow waa carada ugu wanaagsan beerashada waxaana laga helaa meelaha badaha ah ( ).

20.Carada kaduudan waxa ku haboontahay kaliya in lagu beerto dalagyada qaarkood waxaana laga helaa meelaha lama degaanka ah ( ).

Qeeybta: 3aad

DOORO JAWAABTA AAD SAX U ARAGTO

1.Waxaa lagu qiyaasaa da'da dhulka ku dhowaad:

b) 1000 milyan sano. t) 100 milyan sano. j) 1800 milyan sano. x) No.

2. Waxaa lagu qiyaasaa da'da qolofta dhulka ku dhowaad:

b) 2000 milyan sano. t) 170 milyan sano. j) 150 milyan sano. x) 1500 milyan sano.

3. Waaga ugu dheer waayada jiyooloojiga waa:

b) Waaga saddexaad. t) Waaga labaad. j) Waaga afaraad. x) Waaga koowaad.

4. Carro waxaa loola jeedaa:

b) Mid meel isuku tagtay. t) Dhagax burburay. j) Mid dabiici ah. x) No.

5. Isdhaafsiga kaarboon laba oksaydka ah oo u dhexeeya nololeyda waa:

b) Carrada. t) Hawada. j) biyaha. x) No.

6. Gibilka nololeyda wuxuu ka koobanyahay:

b) 12 t) 5 j) 11 x) 4

7. Astaamaha nololeyda waxaalagu karan karaa:

b) hal asataan t) laba astaan j) sadex astaan x) No astaan.

8. Carro madowda waxaa lagu tiriyaa:

b) tan ugu quruxda badan t) tan ugu wasakheysan j) tan ugu wanaagsan x) tan ugu saameynta badan.

9. Carradu waxa ay ka koobantahay:

b) walxo macdaneed t) dabeel j) dhagax meeldagay x) meel ay foolkaano kadhacday.

10. Dhagax burburka waxaa sababa:

b) biyo la'aan t) meel biyo dageen ah j) biyo socda x) No.

11. Tuulimaaka qulqulka hawada awgeed waxaa la soo qaatay:

b) burburka dha kaxaanta t) burburka iskaarsiinta j) burburka foolkaanada x) burburka carrada.

12. Keymaha waa qeybta ugu weyn uguna muhiimsan waxayna kabaxdaa:

b) dhulka hoostiisa t) meelaha laga helo biyo la'aanta j) meelaha laga helo biyaha x) meelaha laga qodo carrada.

13. Haramuhu sida caadiga ah wuxuu kabaxaa :

b) meela biyo la'aana ah t) meelaha oo uu roobka yar ka da'o j) koonfuta waqooyi x) No.

14. Qeexida gobol dabiici ah waxaa loolajeedaa:

b) gobol astaan la'aan ah t) gobol biyo leh j) gobol astaan leh x) No.

15. Ahmiyada dha qaale ee gobolada waxaa kamid ah:

b) beerashada dalaga t) xoola dhaqashada j) isticmaalka dhirta x) No.

16. Aadanaha waxaa lagu tiriyaa qeyb muhiim ah oo ka tirsan nololeyda waxaana ka mid ah:

b) san-duleynta t) in la dabcado j) dhul beereedka x) dhismooyinka daaraha.

17. Waxyaabaha saameeynta filiqsanaanta xayawaanada dhulka oogadiisa waxaa ka mid ah:

b) dhirta qoyan t) wabiyada j) dhirta dabiiciga ah x) No.

18. Waxyaabaha filiqsanaanta dhulka oogadiisa waxaa loo qeebiyey:

b) 3 t) 6 j) 10 x) 7 .

19. Tilmaama cimilada ee gobolada waxaa lagu fahmikaraa:

b) roobka oo yaraada t) faraqa heerkulka maalintii oo aad u wyn

j) in uu heerka barafka oo gaaro 60m. x) in uu yaraado barafka.

20. Gobolada kuleelaha ah meelaha ay ku fidsanyihii waxaa ka mi ah:

b) gobolka baay t) gobolka sanaag j) waqooyi iyo kan koonfureed x) No.